**DAAWADAADA: Hydrochlorothiazide (HCTZ) ____ mg**

**Maxaan u qaadanaya daawadan?** Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadii aan la iska daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa dhiig karka hadii aan lagaa daawayn.

**Qaado 1 kiniin ah intaanad waxba cunin aroor kasta.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad liqin kiniinka.

**Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan:** Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaaa saamayn ay kugu keento daawadu. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaar ka iman karta qaadashada daawada HCTZ ayaa dhici karta hadii aanu jidhkaagu horey ula soo qabsan waxaana kamid noqonkara dawakhaad, shuban, amateedka oo kaataga, calool xanuun, iyo madax xanuun.

Saamaynta qaarkeed ma dhacaan badanka lakin hadiiba ay dhacaan waa halis. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; wajiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha oo barara; dhibaato kaa haysato neefsashada ama neefsashada oo kugu adkaata; xanuunka indhaha/aragga oo yaraada; ama, kaadi yar ama aan jirinba.**

**Maxaan u baahanahay inaan ogaado**

1. Waa inaad qaadato daawadan maalin walba xataa hadaad caadi dareento.
2. Waa inaad dib usoo qaadataa daawadan bil kasta.
3. Ha cabin wax aalkalo ah. Cab biyo badan.
4. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Lisinopril.
5. Hadii aad uurleedahay, jooji qaadashada daawadan hada. Kusoo noqo xarunta caafimaad ee Grace Village Medical Clinic si aad ula kulanto dhakhtarka oo kuugu raadiyo daawo kale oo dhiig karka oo aad qaadato.

"Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su'aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn."